



Saint Paul
PUBLIC SCHOOLS

VOTE
NOVEMBER 6, 2018

Our Kids. Our Community. Our Future.

Taxaddiga/Hawsha:

Si aan ula soconno xawliga waxbarashada carruurteenna islamarkaana ugu helno dhaqaale ku filan

Su'aalaha Cod-bixinta:

Tix-galinta in la kordhiyo canshuurta sii SPPS ay ugu suurto gasho in la maal-galiyo iskuullada lagana dhawrsado in la jaro miisaaniyad kale

Maxaa Keenay In Xilligan La soo Jeediyo Canshuurta?


- SPPS waxay jartay miisaaniyad dhan \$50 malyuunn saddexdii sano ee la soo dhaafay waxaana la ansixiyay in la jaro \$17.2 malyuun sanad-dugsiyeedka 2018-19.
- Dakhliga laga helo dawladda federaalka ah iyo tan gobolka lama jaan-qaadayaan sicir bararka iyoo baahida waxbaerasho ee ardayda.
- Adeegyada waxbarashada gaarka ah ee loo baahanyahay waxay Degmada ugu kacaan \$42 malyuun oo ah kharash ka badan inta ay sanadkii helaan, arrintan oo cadaadis dheeraad ah sii saaraysa miisaaniyadda guud ee lagu shaqeeyo.

Maxay tahay Canshuurtan lagu Shaqeynayo?

Canshuurtan la soo jeedinayo waxaa lagu maal-galinayaa hawlaha fasalka, waxbaraidda iyo kharashaadka kale ee fasalka.

Iskuullada dadweynaha oo xooggani waxay si toos ah xiriir ulal leeyihiin wanaagga bulshadeena iyo qiimaha guryaheenna iyo handtideena.

Canshuurta Hawlgalka ee Codbixiyayaashu Oggolaadeen, 2018-19



SPPS waa degmada labaad ee ugu weyn iskuullada gobolka Minnesota, haddana waa degmada ugu hoosaysa marka la yiraahdo dhinaca oggolaanshaha codbixiyeyaasha ee canshuurta marka la barbar dhigo tobanka degmo ee ugu weyn gobolka iyo kuwa deriska la ah SPPS. Lacagahan waxay bixiyaan kharashka muhiimka ah ee fasalada, barista iyo kharashyada kale ee hawlgalka.

Haddii ay cod-bixiyeyaashu oggolaadaan codsigan, saamaynta ay canshuurtu ku

yeelanayso guri walba (guryaha qiimahooda yahay qiyaastii \$175,000) waxay noqonaysaa \$11 bil walba. Dhaqaalahani wuxuu SPPS ka caawinayaa:

- In lagu maal-galiyo iskuullada iyo ardayda fasalladoo dhan
- In lagu hirgaliyo Qorshaha Istiraatiijiyadda ee Degada si loo kordhiyo guulaha waxbarashada ee dhamaan ardayda
- In la kordhiyo adeegyada caafimaadka ee dhimirka iyo bulshada si loo taageero ardayda
- In la sameeyo dugsi dhexe oo loo qorsheeyay inuu daboolo baahida waxbarasho iyo tan korriinka maskaxda ee ardayda islamarkaana uu u diyaariyo inay galaan dugsi sare iyo meelo ka sarreeya
- In laga dhawrsado in la sii jaro miisaaniyad kale

Haddii ay cod-bixiyeyaashu oggolaan waayaan codsigan, waxaa SPPS soo food-saaraysa

in miisaaniyadda laga jaro malaayin-doolar, arrintan oo keenaysa in la yareeyo shaqaalaha iyo barnaamijyada waxbarashada ee ardayda fasallada oo dhan.

Wax badan ogow: Booqo spps.org/referendum2018
Wac 651-767-8157 • Email u dir referendum@spps.org

Waxaa diyaariyay o maal-galiyay Dugsiyada Dadweynaha Saint Paul. Daabacaaddani wakiil kama aha musharaxiinta u tartameysa doorashada iyo waliba su'aalaha doorashada.